



HOGHOL

Dooqaadky Af Soomaaligy - Maayky - HOGHOL Soomaali Maay Newsletter
| Bil'ly - Monthly |

Walaa Tiroothuung ki jero

- 21ty Febraayo (1)
- Maalingty Afky Aayoow (2-4)
- Jamaa'athy Baardheere (4-5)
- Magmaag (5)
- Dhaghanky (5)
- Manaahijta walbarashoothy
Dowladda Federaalky (6)
- Wargiling (6)

Tifaftiry: Abdullahi Sheikh
Mahamad

Aasaasy - Founder

Goobty Horumariyoky Afky Maayka (Afmaay Development Center), maay la aasaasy sanadky 2017. Sababty liing aasaasy maaybuwaaha horumariyowky afky ii dhaganky Maayky (Af-Soomaaligy Maayky).

Maay ha dhawaayaanee dhammang dadky ky howlling horumariyowky afky-aayow, Af-Maay.

Abdulkadir Abukar Sheikh, Founder Af Maay Development Center (ADC)

Email:

afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Facebook: <https://www.facebook.com/afmaaydevelopment/>

Office: Baidoa, Sheekh , S/Land,
Muqdishu i i Örebro, Sweden.


21ty Febraayo Sinid Kasty Maaling Adduungky Dhong Luku Husaaw Afky Aayoowu



Geegy Aalamigy Afka Aayow
Maalinta Caalamiga Afka Hooyo
21 Febraayo 2021

Internationella Modersmålsdgen
International Mother Language Day

afmaaydevelopmentcenter@gmail.com
Hoghol Afmaay Newsletter
Baidoa, Muqdisho, Sheikh & Örebro



**May Liing Aasaasi Maalingty/Geeky Aalamighy e Afky Aayoow
Maxaa Loo Aasaasey Maalinta Caalamiga e Afka Hooyo
varför upprättas en internationell modersmålsdag
Why International mother language day is established**

Maalingty Aalamighy e Afky Aayow way liingky talagaleey in liky dhiirigiliyo jiritaanky afafky aduungky kulishoo. Erey haang “Afky Aayoow” istimlaalsheey may haku jereey ilaa i qarnigii 15aad wadamee bershoo, gaar haang Yurub. Fasir haang ereyka “Afky Aayoow” way ku kooyeey fasir toos eh oo liki suubiyi ereyky Latingky e “lingua materna”. Ingkasoo geeky dadky adduungky is dhagaly, siyaabo shal geddising iyee ing istimaalaayaang ereyky Afky Aayow. Wadamee bershoo yee may eraayaanaa “Af Guri”- “hemspråk”- “home language”.

Maddii inky horeeyti la aasaasy Maalingty Afky Aayow, way haayteey sinidkii 1999 aynaa ky dhawaagheey Hay’adda Walbarashooda, Sayniska i Dhaghanky e Qaraamathy mithoowi (UNESCO) waayna husteey sinidkii koowaad 2000. Ilijeedithy liing aasaasi way haayteey keeythiyoowky i hormariowky afafky adduungky iyo ing dadky la hasuusiyo inii haqy ing leyiing hornimy ingky dowahoowky Afkii Aayoow, waany qoro koraang maadamaa afky haq asaasi eh kuna mid eh huquuqy qofky bani’aadamky (Human Rights) leyi, taas oo awood ing siyaasy qof kasto inii usy ku qiib qaathitho hooloo bulshidy. Wey jeraane afaf dad yar ki hathalaayaang aduungky oo liing kasaaw “minority languages” dakaas oo iniing suurty galny inee ku qiibqaathithaang horumarky bulshithiyoo. Hay’addy UNESCO way dalalky aduungky ky waaniyaasee inii ly horumariyo Afky Aayow, walbarashoothy dugsiyaana liky dhiko, iyooghoo ki jeraang afafky dad tiry yar ki hathalaayaang “minority language”.

Sinidkasty ingty ing dhaheyty 21- 23 Febraayi way ly qobotheyee barnaamijyi iniisky jeraan seminaarry i kulumo shal geddising Afky Aayoow liki husaaw, waany liky hormariyaaw.

Afafky Aduungky: Aduungkuung una ky noolny way jeraana ilaa 7139 af hanaas oo aduunyathya ku dhikaayaang goobo shal gedising iyeethoo ku jerto isly noolaanshy bulshiyaal shal geddising. Shanty af e aduungky dad bathang ky hathalaayaagn way-buwaaha: Ingiriisighy o ky hadalaayaang dad liky qiyaasy (1, 348 milyang) , Mandriin-Shiiny (1,120 millyang), Hindi (590 milyang), Isbaanish (534 milyang), Faransiis (280 milyang) iyo Arabi (274 milyang). Laakiing luqady Mandiriin (Shiiny) wey galaasee kaalinty koowaad, madii liing fiiriyo dadky dhalashy haang (Native speakers). Mandarin Shiine luqadaas oo asal ahaan ky hadalaayaan dadkaas oo tiradiyoo liky qiyasow (921 milyan qof), Mandiriin oo eh luqadiyoo koowad oo iyoo ing dhalatheeng. Tang lamaadny way naghathaasee Ispanishky iyo afky Ingiriisky oo naghathaaw kang seddahaad.

Way kaloo jeree ing dadky aduungky ki nool 43% eyiing dad ky hathalaaw lamma af (bilingual), taasoo ku dhikaaso inii 66% dadky ky hathalaaw Afky Ingiriisky ing barathaayaang luqadiyoo lammaad ahaang. Luqaddy Sawahilighy iyee dad bathang ing ethy

luqadiyoo lammaad, iyeethoo wadamy bathang e Afkrika ing ety luqadiyoo rasmiga eh dowladdy istimaalaso (Official language), sidy wadamada Tanzania, Kenya, Ugandha I Democratic Republic of Congo. Guud haang, luqathoo aduungky way eyiinaa wal mar-kasty isbedelaaw, oo sinid kasty is beddel ki dhiyaaw haathooy dhangky hormarky amy dhangky hoos ing dhiyoowky.

Af Soomaalighy Maayky: Af Soomaalighy Maayky dadky ky dowahaaw/hathalaaw way liky qiyaaseey 3,600 ilaa 4,2 milyang qof oo deqeng dalky Soomaliya, Kenya i Ethopia. Af Maayky way leyaa lahjatho shal geddising oo liingky hathalaaw/dowahaaw gopolee Bay, Bakool, Shipeelithy hoosy, Jubbathy hoosy, Jibbatha dhehe, Gethy i Banaadir. Ulaamathy gopoleethuung hang katy iyee haayeeng haanii eed inky dethaaly inii Af Maayky dadky liky baro ilmigha Diinty Islaamky oo noo kasty leh. Ulmaathaas may ku mid haayeena Sheekh Uweys Al Baraawy, Sheek Abdilloow Issak, Sheikh Abdiyow Usmaanow, Sheek Hassang Hariing, Sheik Abdiramaang Sheek Ibreying Maalling, Sheek Mursal Maalling Aliyoow i ulmy kaly oo eed ing bathang.

Alifbeetada Afky Maaky wey eed ingky dethaaleeny aqoonhayany i dhallinyaro bathang oo ky noolaayeen dalka gudaashee i banaansheey. Gaar haang dhalinyaradii Maayky haku jeedi e ki noolaayi dalky Sacuudiga, Kanada, Ingiriiska, Swedhen I Mareykanka. Shirar bathang o ky saabsing horumriyowky Afky Aayow ya wey liky qopothwey wadamy bathang sidy, Kanada, Ingiriiska Isweden I Turkigy. Farty Maayga wey ku koobingta 29 haraf, 24 shibbly (consonant) I 5 shaqal (vocal). Afky Maayky, wey kaloo jiree mareeghyaal dhinigy Internetka oo liky qoraaw sithy marregty biyooley.com, sydvastsomaliska.org iyo warbaahinty bulshaady (social media).

Sanadky 2021 e Husky Afky Aayoow: Kulumo i haflathy bathang oo ky saabsing husky Afky Aawow, gaar haang Afky Maayky, iyee sinidkuung liky shal qopothy Muqdishy, Baydhowu iyo Nairobi. Kulumee iyo haflathoo ay ha qabangqaapiyeey Uururky le erraaw "Kutubtii Afkii-Aayow" i ururro kale Afky Maayky ing hoolgalaw. Kulumeethy way haku qiibgaleeny madah, aqoonyahany, afyaally, dhaalinyary, hanghraab iyoonaay dad bathang o ky dowahaaw Afky Maayky. Kulumeethaas iyoonaay haflathooghaas way lahky bang-dhikeey suughaan ky saabsing Afky Aayow ee Maayky i kudbathy ki saabsing taariikdy Afky Aayow ee Maayky. May kaloo lahaky bang dhikeey goobty haflathoo ki-taaby/buughaag ky qorong Afky Maayky.

Lamathuung masawir haflatheed oo hoose may liky shal qopothwey Baydhowu (bithy) i Muqdishy (mithig) aynaa qopothwey Kutaabty Afky Aayoow.



Dooqaadky Hoghol, way hambalyi in direey dhammaang dadky aduungky ky nool, gaar haang Umuty Soomaaliyeed ku sii gaar haang dadky ky dohowaayaang Afky Aayow e Maayky, meel kasty i ky noolyiing, way lenaa hambalyi. Way kaloo lenaa halky de-thaalooy, horumariyowky Afky Ayow i si liin badbaathiyi lahaayi Afky i dhaghanky Maayky.

Diyaaring: Abdulkadir Abukar Sheikh (Dhalib)

<https://www.ethnologue.com/guides/most-spoken-languages>

Taariikdy Jamaa'athy Baardheere: Qeebti 9aad Baardheere Historia=Baardheere History

Ulmaathy Baardheere may ku mid haayeeny ulmaathii ingky horreeeyi Afky Maayky umuty Soomaliyeed diinty ki barayyi. Ilaaheey ing watha nahariisy



Jamaa'athy Baardheere may ilmi diimeed lahangku weydiisithi jereey gopollee deghaaso umuty Soomaalithy oo dhong Maay tari i Maxaa tirby leh

Sheek Mahamad Adam (Eething) Keeroow (24 Sanno, 1854-1878)

Qeebti 8aad waybaa hangky hathalneeey billaawkii reed ing dhissowky Jamaa'athy Baardheere iyo hoolooghii lahang mari, si gaar eh wal qobodki Aw Sheek Mad Eething keeroow oo ky mid haayi dadki ku badbaadi weerarkii lahaki qaathi Jameeda Baardheere. Ku reedny ing boktaali buulithy hilyshiid i Koromeey (Baardhere korshe), Buur-Hakaba iyo Saudi Arabia.

Marki Sheek Mad Eething keeroow iyo ulmy deerasy ilaa 30 qof kooyeng Baardheere, way aragheeny meelii beledky haathy jerty oo duurowty oo dadby ing deqennaayne. Markaasaa way billaaweeny dhul binnaayoow, hilyaal suubiyoow, dadky iniisky weeraang oo misaajdky ly dhiso oo laha noolaayo adkaarty I halaqaadky diinigy.

Sannadky marky haayi 1865 H waybaa arlaathy ky billawitheey kooyoowky dad reer Yurub eh oo isky sheegayaan sahmiiyayaal. Waybaa sannadkaas Baardheere ha deerey dad Jarmal eh oo usu hoggaamiyaayi lang le errayi Karl Von Der Decken, Dadkaas way baddy hegshee Goobweyn, jubbada hoose, haku galeeny wapy Ganaane (Jubba) waybaany ing dareereny ing iyo oghaathang far'angky wapighy (ilaa Ethiopia) sidi usu sheegy Decken. Laaking waybaa ognaa ing sahangshoo ungu moqonaayny dhul i kheyraad weeydis.

Sahmiyeyaalkaas way wedetheeny doong-wiing/Markab-yar. Meel kasty yoo deer-aang, way aruuriyaayeeny haalky arlaathy i dadshee waana abtughurhaayeeng. Maddii markabsho ha deery Baardheere korshee qiyaas 30 km iyee Markabkii ky burburi, meely liing kasaayi Mathagessile oo haddy ling kasaw “Markabley”. Faah-faahinta sahangkaas meel kalee kiy sheeghee Insha Allah. Si kasty haato dadky rer Markabley wey dileeny 2 qof oo ky mid haayeeng Decken naftiis iyo lang kaly le erraayi Linck. Inty kale wal qopothi, way liing jeeyey Ulul Amrihy Baardheere, Sahmiyayaakii kale dathaa liky dari si ing deersiyaan maamulki Kismayo oo eed ingky farahi arrintaas eedny ingky mahadnaghi maaamulky Jamaa’athy.

Sheek Mad Eething Keeroow Illahey ajar ii hasanaad siyaa eethaa hang noolaayi Jamaa’atha Baardheere. Way reed ing dhiseey Baardheere beled haang, Jamaa’a neped ky nool iyo aasaaskii daarul fiqhighii ingky wiinaayi geesky Afriky. Sheeqy wayba Ulul Amri haayeey muddo 24 sini. Sheeqy sithii Ulul-amriyaalky ku hor-rooyi waybaa liky duugheey qapuuro Masaajidky Jaama reedsheey. *Ly darer qeebti 10aad*

Diariying: Omar Abdulqadir Sh. Abdirahmang

Magmaag (Ordspråk): Beeng fokoti rung mi deeraaso:

Magmaaduung maay sheeghaasee ing beengty bershee rung liing nekaaysiyi hatina muddo dheer dadka kid ha faafti oo iyoow liing oghaane inii yee beeng ety hoo walii rung haayi laha sheegho mai rumoosithaaw maay weeli beengtii horaa hirhelli dadka dhong maay ing haasysithaane ama ogyiinaa inii beentaas rung ety. Maaynaa dhiyo kortee inii beengtaas sithaas rung ahaang ingki dhamaato ilaa ku abad, maaykaloo dhiyokortee haddii liki ad-kaaisitho oo dadka rungtu wedetho ki adkaaisithaan markaatina ing halaang inii beengtii fokoti luku dabaseethoo li beentooyo oo sithaas dadki ki oghaathaang rungty. Sithaas dartiyee yee liing arri Beeng fokoti rung mi deeraaso hoo deertoona muddo dheeraa ki qaathithaase

Diyaaring: Omar Abdulqadir Sheikh Abdurahman **Fasiraad:** Abdullahi Sheikh Mohamed

Dhaghang (Kultur): Hunguri Suubisky




Walaa ku muuqitho masawarka bithy maay-buwaaha:

- 1-Kur Bung dhaasy supug eh liky dubi ki jero
- 2- Kaal buneed kurty ky dha jerto
- 3-Daangqy/Qemer/Bubuky baaquli ki jero
- 4-Sahang ambuuly (misgy tignjhir leh) oo tooring (subuqy bungky ii sokor iyee liki kor shibi daangqithina li kor saari)
- 5-Shaahi li eddaayi ama addees eh. Ar isky aamoowshoo mayaa

Kur bung, Sahang ambuulo, Baaquli Daangqy i shaahi adees

Diyaaring: Abdullahi Sheikh Mohamed



Wargiling: Dooqaadky Hoghol maaybaa ha dhawaayee walaaghii taly ii fikirid ky saabsing hurmariyoky Afky-Maayky: Haniikily hariir: Qofkii haayo, qoraaly, taariikdy, suugaanty Afky-Maayky, haniingky dir:

Eamil. afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Goobty Horumariyowky Afky- Maayky - Afmaay Development Center (ADC)

c/o Sydvästsomaliska Riksförbundet I Sverige Föreningarnas Hus

Slottsgatan 13A, 70361 Örebro, Sverige

Tel. 019-133110

Manhaj Jangjeero

Manaahijta Walbarashootha Dowladda Federaalky mi dheel-litiring.

1- Buugaagty Mahaa tirileey ky qoronyiing

2- Gopolee koofureed afshoo, taariigdiyoo iyo Dhaghanshoo ku moqonyiing buugty taariikdy iyoonaay haang af Soomaalighy addaala dorruwaa hal sahooy

AMDC